

Parent/Caregiver Interview
Wareysiga Waalidka ama Daryeel Bixiyaha

Magaca Ilmaha:..... Taariikhda Dhalashada:

Magaca qofka warbixiyaha ah:

Xiriirka kala dhexeeya Ilmaha:.....

Taarikhda Maanta:

Waalidkoow ama Daryeelbixiyooow,

Si Ilmahaaga loo siiyo waxbarashada ku habboon, waxaan rabnaa inaan ogaanno koboca luqaddiisa iyo waxbarashadiisa. Jawaab sax ah ama qalad ah ma jirto marka Su'aalaha laga jawaabayo, laakiin waxaa muhiim inaad u jawaabtid si humsiimo iyo daacad ah, si uu markaa Ilamahaaga u helo faa'iidada daryeel waxbarasho habboon.

Haddii gurigaaga hal luuqad ka badan looga hadlo, fadlan jawaabahaada ku dar dhammaan luqadaahaas kale.

Markii uu ilmahaagu yaraa ee dhallaanka ahaa:

1. Imisa jir ayu uku billaabey inuu hadaaqo ama hadalka?_____ Imisa jir ayuu ahaa markii uu ku hadaaqey kalimadihii ugu horreeyey?_____ Imisa jir ayuu ku billaabey inuu weero ama hadal buuxa ku hadlo ama ku dhawaaqo?_____
2. Wax dareen ah ma ka qabtay markii uu billaabayey hadalka?

3. Luuqaddee ayu uku yiri Ilmahaaga kalimadihii ugu horreeyey ee u ku hadlo?

4. Luuqaddee ayuu Ilamahaaga ku hadlayey markii uu dhallaanka ahaa?

5. Luuqaddee ayaad kula hadleysey Ilmahaaga markii uu dhallaanka ahaa? Haddii aad luuqado badan kula hadleysey, ma sheegi kartaa qayaasta muddada luuqad kasta aad isticmaaleysey boqolkiiba?

6. Luuqadehee kale ayaa dadka guriga kula deggan, (sida daryeel bixiyayaal, kaaliyayaal ilmaha kula haya, walaalo ama qaraabo) kula hadlayeen Ilamahaaga markii uu dhallaanka ahaa? Haddii aad luuqado badan kula hadleysey, ma sheegi kartaa qayaasta muddada luuqad kasta aad isticmaaleysey boqolkiiba?

7. Luuqaddee ama luqadehee ayaad ugu heesi jirtey ama ugu sheekeyn jirtey Ilmahaaga markii uu dhallaanka ahaa?

8. Da'dee ayuu ahaa markii ugu horreysey ee ilmahaaga afka Ingiriiska lagula dhaqmeey (Tiiviiga, walaalo, daryeelayaal, iyo Dusgi, iwm.)? _____
9. Imisa sano ayuu Ilmahaaga ku nool yahay waddan afka ingiriiska looga hadlo? _____

Marxaladda (waqtigan xaadirka ah) hadda lagu jiro:

1. Luqaddee ama luqadehee ayaa loogu hadlaa inta badan guriga uu Ilmaha deggan yahay hadda? Haddii aad luuqado badan kula hadleysey, ma sheegi kartaa qayaasta muddada luuqad kasta aad isticmaaleysey boqolkiiba?

2. Luuqaddee ayey walidiinta inta badan kula hadlaan ilmaha hadda?

3. Luuqaddee ayuu ilmahaaga hadda kugula hadlaa inta badan?

4. Luuqaddee ayuu Ilmahaaga jecel yahay inuu ku hadlo guriga (walaalaha, daryeel bixiyayaasha, kuwa ilmaha kula haya, ama ehelka iyo qaraabada)?

5. Luqaddee ayaa ilmaha lagula dhaqmay meelaha ama dhacdooyinka bulshada ah (ciyaaraha ilmaha, masaajidda ama meelaha lagu cibaadeysto iyo kulanka bulshada)?

6. Ilmahaaga ma ku adag tahay inuu fahmo afkiisa hooyo ama afka giriigga? _____
7. Ma dareensan tahay in ilmahaaga ay ku adag tahay inuu sheegto wuxuu rabo ama uu doonayo? _____
8. Wax dareen ah ma ka qabtaa hadda sida uu ilmahaaga u hadlo? Haddii ay haa tahay, maxay yihiin dareenka aad qabto? (sida hadalka oo ka soo daahey, shigshig, tiraabta)?

9. Ilmahaaga ma u bartaa ama ma u bartay luuqadda sida walaalihiisa kale ee wiilasha iyo gabdhaha?

Khibradaha kale ee waxbarasho ama dugsi:

1. Ilmahaaga ma la geeyey dugsi xannaanada dhallaanka? _____ Haddii ay sax tahay, luuqaddee ayuu macallinka kula hadlayey?

2. Ilmahaaga ma yaqaanaa akhriska? _____ Haddii ay haa tahay, luqadee ama luqadehee?

3. Ilmahaaga ma yaqaanaa qorista? _____ Haddii ay haa tahay, luuqaddee ama Luqadehee?

4. Ilmahaaga ma akriyaa oo ma ma qoraa luuqaddiisa koowaad? _____
5. Ilmahaaga dugsi ma soo dhigtay intii aan Ameerika la keenin ama u soo guurin? _____
 - Haddii ay haa tahay, xaggee ayuu dugsi ku soo dhigtay? _____
 - Luuqaddee ayaa wax lagug barayey? _____
6. Ilmahaaga marna dugsiga uu dhiganayey muddo ma joojiyey? _____ Haddii ay haa tahay, muddo intee le'eg? _____
7. Ilmahaaga dugsiga ma aadaa maalin kasta? _____
8. Ilmahaaga ma ku adag tahay waxbarashada? _____ Haddii ay haa tahay, fadlan sharraxaad kooban ka bixi:

9. Ilmahaaga marna ma la siiyey adeegga waxbarashada gaarka ah (macalimin gaar ah) oo ku kaalmeeya waxbarashada? Haddii ay haa tahay, fadlan si kooban u sharax:

Wax kale oo dheeraad ma innooga sheegi kartaa khibradaha waxbarasho ee Ilmahaaga hore u soo maray? _____
